

## Heshiiska Dublin

Xaq uma lehid inaad doorato wadanka baaraya oo go'aan ka gaaraya codsigaaga magan galyo. Wadamada Midowga Yurub iyo Noorweey iyo Islaand waxa ka shaqeeya heshiiska Dublin. Heshiiska Dublin ayey ku xakameynayaan wadamada dalka mas'uul ka noqonaya codsigaada magan galyo. Codsigaada magan galyo waxa kaliya oo lagu baarayaa hal dal oo ka mida wadamadan.

### Waa dalkee kan baaraya codsigeyga magan galyo?

Xataa haddii aad ka codsatay magan galyo Iswiidhen oo aad dooneyso in codsigaada lagu baaro halkan, ma hubna haddana inaad taa xaq u leedahay. Wadan kale oo saxiixay heshiiska Dublin ayaa mas'uul ka noqon kara baaridda codsigaada. Waxaa qasab kugu noqon karta inaad ku wareegto dalka. Arimahan soo socda ayaa keeni kartaa arintaa:

- haddii aad dal ku gal/fiise ama sharci ka heshay mid ka mida wadamada saxiixay heshiiska Dublin.
- haddii aad sharci daro ku soo gashay mid ka mida wadamada saxiixay heshiiska Dublin.
- haddii aad magan galyo ka codsatay mid ka mida wadamada saxiixay heshiiska Dublin.
- haddii reerkaadu sharci ku leeyahay wadan kale ee Midowga Yurub waxey taa keeni kartaa in isla wadanka uu baaro codsigaada magan galyo.

### Faraha oo laga baaro database (kombuyuutar)

Wasaaradda socdaalku waxey faro ka qaadeysaa dhamaan magan galyo doonka da'doodu ka weyn tahay 14 sano. Faraha waxa loo dirayaa kombuyuutarka database-kiisa, Eurodac, halkaasoo laga soo baarayo. Baaritaanka ayeynu ku arki karnaa haddii faro lagaaga soo qaaday wadan kale ee ku xiran Eurodac.

### Haddii ay noqoto in wadan kale baaro codsigaa-da magan galyo

Haddii ay noqoto in wadan kale ee ka tirsan Midowga Yurub uu mas'uul ka noqdo baaridda cod-

sigaa magan galyo, waxa wasaaradda socdaalku sida caadiga ah u go'aamineysaa in lagu wareejiyo dalka. Haddii aadan ka qeyb qaadan inaad ka baxdo Iswiidhen waxaan xaq u leenahay in qasab la isticmaalo.

### Racfaan ka qaadashada go'aanka

Haddii aad ka soo horjeedo in dal kale uu baaro codsigaada magan galyo waxaad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadato maxkamadda socdaalka. Racfaankaadu waa inuu maxkamadda socdaalka soo gaara 21 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta aad heshay go'aanka.

Ogoow in racfaankaadu ku saabsan yahay wadanka baari lahaa codsigaada magan galyo ee aanu ku saabsaneyn codsigaada magan galyo ee halkan. Xataa haddii aad racfaan qaadatay waa inaad ka baxdaa Iswiidhen.

### Wadamadan ayaa saxiixay ...

... Sharci nidaameedka Dublin

Wadamada Isutaga Yurub(EU) Sida: Biljam, Bulgariya, Khubrus, Danmaark, Eestlaand, Finland, Faransiiska, Giriiga, Ayrlaand, Talyaaniga, Leetlaand, Litaweeniya, Luksambeerg, Maalta, Holand, Boolean, Boortiqiiska, Romaaniya, Islofaakiya, Islooeniya, Isbayn, Boqortooyada Ingiriiska, Iswiidhan, Jeekiyen, Jarmalka, Hangeri iyo Awsteeriya. Laakiin Wadamada Noorweey iyo Ayslaand waxaay uga mid yihiin oo ugu xiran yihiin heshiis gaar ah oo ay la galeen wadamadaas.

... Eurodac

Dhamaan wadamada Isutaga Yurub (EU) Waxaa ay ku xiran yihiin Keydka Kombiyuutarada ee la yiraahdo Eurodac. Laakiin Wadamada Noorweey iyo Ayslaand waxaay uga mid yihiin oo ugu xiran yihiin heshiis gaar ah oo ay la galeen wadamadaas.